Special education is special instruction designed to meet the unique needs of a student experiencing a disability.

The services are provided at **no cost** to the families.

The services can be provided in many different school settings.

Waxbarashada gaarka ah waa waxbarid gaar ah oo loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga kala kulmaan naafanimada.

Adeegyadan waxaa lagu siiyaa qoysaska si bilaash ah.

Adeegyadan waxaa lagu bixiyaa goobaha kala duwan ee dugsiyada.

Intellectual Disability
Naafonimada Maskaxda

Vision Impairment
Arag La’aan

Orthopedic Impairment
Dhaawaca Lafaha

Traumatic Brain Injury
Dhaawaca Maskaxda ee Kadiska ah

Deafness or Being Hard of Hearing
Dhago la’aan ama Maqal la’aan

Deafblindness
Dhago iyo Indho La’aan

Other Health Impairment
Naafonimada Caafimaadka kale

Specific Learning Disability
onimada Barashada Gaarka ah

Speech Language Impairment
Dhaawaca Hadalka iyo Luuqadda

Emotional Behavior Disability
Dhaawaca Dhaqanka iyo Dareenka

Autism Spectrum Disorder
Cudurka Carruurta (Autism)-Maangaar-

Developmental Delay
Dib-u-dhaca Horumarka

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

SOMALI / SOOMAALI

What is an **intellectual disability**?

When a student requires specially designed instruction due to overall developmental differences in all of the following areas:

- Intellectual functioning (e.g., reasoning, problem solving skills)
- Adaptive (practical life skills)
- Academic achievement

Waa maxay **naafonimada maskaxda**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay iyadoo ay ugu wacan tahay kala duwanaanshaha korriinka guud ee dhammaan meelaha soo socda:

- Shaqada maskaxeed (tusaale, sababaynta, xirfadaha xalinta mashaakilaadka)
- La qabsiga (xirfado nololeed oo la taaban karo)
- Guul waxbarasho

What is **deafness or being hard of hearing**?

When a student needs specially designed instruction due to deafness or being hard of hearing, and an audiologist evaluation indicates the hearing loss meets specific criteria:

- Difficulty hearing in one or both ears
- Difficulty hearing tones (high or low)
- Difficulty hearing volume (high or low)
- Not treatable by medical staff

Waa maxay **dhago la'aan ama maqal la'aan**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo qaabeeyey oo ay ugu wacan tahay dhego-la'aan ama dhego jigid, oo baaritaanka (audiologist) maqal-yaqaankana sheegay in maqalka uu ardayga lumiyay ay buuxisay shuruudo gaar ah:

- Dhago li'id hal ama labada dhegood
- Dhawaaqyada maqalka oo adkaata (sare ama hoose)
- Mugga maqalka oo adkaata (sare ama hoose)
- Ma daweyn karaan shaqaalaha caafimaadka

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is a **speech language impairment**?

When a student requires specially designed instruction due to:

- Differences in how a student speaks/ makes speech sounds and/or understands and uses language in all the student's language(s).
- Voice quality or loudness.
- Repeating sounds or parts of sounds, called stuttering.
- Speech sounds are difficult to understand.
- Understanding, learning and using words.
- Using words, grammar and sentences that follow the language's rules in a way that makes sense to others.

Waa maxay **dhaawaca hadalka iyo luuqadda**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay iyadoo ay ugu wacan tahay:

- Farqiga u dhexeeya sida ardaygu u hadlo/u sameeyo dhawaaqyada hadalka iyo/ama u fahmo oo u isticmaalo luqadda dhammaan luqadaha ardayga.
- Tayada codka ama qaylada.
- Ku celcelinta dhawaaqyada ama qaybo ka mid ah dhawaaqyada, oo loo yaqaan shig-shigid, (stuttering).
- Dhawaaqyada hadalka way adagtahay in la fahmo.
- Fahamka, barashada iyo adeegsiga erayada.
- Isticmaalka erayada, naxwaha iyo oraahyada raacaya qawaaniinta luqadda si macne u leh dadka kale.

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

SOMALI / SOOMAALI



What is **vision impairment**?

When a student requires specially designed instruction due to a vision impairment including:

- A medical report from an eye doctor or other eye specialist that shows the student has a visual impairment that cannot be corrected by medical treatment, therapy or lens.
- A functional vision evaluation that identifies educational and access needs (e.g., braille, low-vision devices) because of the visual impairment.

Waa maxay **arag la'aan**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay oo ay ugu wacan tahay naafo aragga oo ay ku jiraan:

- Warbixin caafimaad oo ka timid dhakhtarka indhaha ama takhasuska indhaha oo tusinaysa ardaygu inuu leeyahay cillad aragga oo aan lagu sixi karin daaweyn, therapy ama ookiyaale.
- Qiimayn aragga lagu sameeyay oo muujineysa baahida waxbarasho iyo helitaan (tusaale, farta indhoolaha, aaladaha aragga hoose) sababtoo ah arag la'aanta.

What is **deafblindness**?

A need for specially designed instruction due to a visual and hearing impairment including:

- Either hearing or vision impairment but shows unclear or irregular responses in the other sensory area which requires more testing.
- Qualifies for vision or hearing disability and has a physical issue that affects other senses.

Waa maxay **dhago iyo indho la'aan**?

Baahida in waxbarasho gaar ah loo sameeyo oo ay ugu wacan tahay cillad aragga iyo maqalka oo ay ku jiraan:

- Maqalka ama aragga daciifka ah laakiin waxay muujisaa jawaabo aan caddayn ama aan joogto ahayn ee qeybo kale oo dareenka ah oo u baahan baaritaan dheeraad ah.
- U qalma naafanimada aragga ama maqalka lehna naafo jireed oo saamaysa dareenka kale.



What is **emotional behavior disability**?

A need for specially designed instruction due to emotional and behavioral needs due to one or more of the following:

- Inability to learn not due to other factors
- Inability to establish/maintain relationships
- Consistent unhappiness/depression
- Physical symptoms or fears
- Inappropriate types of behavior or feelings under normal circumstances

Waa maxay **dhaawaca dhaqanka iyo dareenka**?

Baahi waxbarasho si gaar ah loo qaabeeyey oo ay ugu wacan tahay baahiyaha shucuurta iyo dabeecadda mid ama ka badan oo kuwan ka mid ah:

- Awood la'aanta wax-barashada maaha sababo kale dartood
- Awood la'aanta in la dhiso/ilaaliyo cilaaqaadka
- Farxad-la'aan joogto ah / niyad-jab
- Calaamadaha jirka ama cabsida
- Noocyada dhaqanka ama dareenka aan habboonayn ee xaaladaha caadiga ah

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

SOMALI / SOOMAALI

What is an **orthopedic impairment**?

When a student requires specially designed instruction due to a fine or gross motor impairment that lasts at least 60 days; impacts quality, speed or accuracy of movement and at least two of the following areas:

- Small movements (e.g., using hands, fingers)
- Larger movements (e.g., walking, larger muscle groups)
- Self-help

Waa maxay **dhaawaca lafaha**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay oo soconaysa ugu yaraan 60 maalmood oo ay ugu wacan tahay naafo guud oo xubnaha iyo dhaqdhaqaaqa ah; saameeya tayada, xawaaraha ama saxnaanta dhaqdhaqaaqa iyo ugu yaraan laba ka mid ah meelaha soo socda:

- Dhaqdhaqaaqyo yaryar (tusaale, isticmaalka gacmaha, faraha)
- Dhaqdhaqaaqyo waaweyn (tusaale, socodka, kooxaha murqaha oo waaweyn)
- Is-caawinta

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is an **other health impairment**?

When a student requires specially designed instruction due to a health condition:

- Medical statement with a health condition that is expected to last at least 60 days
- The health condition impacts the student's vitality and alertness

Waa maxay **naafonimada caafimaadka kale**?

Marka ardaygu u baahdo tilmaamo si gaar ah loo habeeyay xaalad caafimaad awgeed:

- Warbixin caafimaad oo leh xaalad caafimaad oo la filayo inay socoto ugu yaraan 60 maalmood
- Xaaladda caafimaadku waxay saamaysaa firfircoonida iyo feejignaanta ardayga

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is **autism spectrum disorder**?

When a student requires specially designed instruction due to differences in:

- Social communication.
- Interacting with others using back-and-forth communication and flexible play.
- Non-verbal communication using body language, eye contact, gestures and facial expressions.
- Developing and understanding relationships: understanding what other people are thinking and feeling, adjusting behavior and making friends.
- Restricted/repetitive patterns of behaviors/activity.
- Insistence on sameness, routines, patterns of behavior and interests.
- Very sensitive or not sensitive enough to noise, touch, smell and lights.

Waa maxay **cudurka carruurta (autism)-maangaar-**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay taasoo ay ugu wacan tahay kala duwanaanshaha:

- Dad la dhaqanka.
- Dhax-galka dadka kale iyadoo la isticmaalayo xiriir hore iyo gadaal ah iyo ciyaar dabacsan.
- Isgaarsiin a0an hadal ahayn iyadoo la adeegsanayo luqadda jirka, xiriirka indhaha, dhaqdhaqaaqyada iyo muujinta wejiga.
- Horumarinta iyo fahamka cilaaqaadka: fahamka waxa ay dadka kale ku fekerayaan oo ay dareemayaan, hagaajinta dabeecadda iyo samaysashada saaxiibo.
- Nidaamyada dabeecadaha/waxqabadka xaddidan/soo noqnoqda.
- Ku adkeysiga isku midnimada, joogtada ah, qaababka dhaqanka iyo danaha.
- Aad u xasaasi ah ama aan xasaasi u ahayn buuqa, taabashada, urta iyo nalalka.

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is a **traumatic brain injury**?

When a student requires specially designed instruction due to brain injury caused by an external physical force that lasts at least 60 days and results in an impairment in one or more of the following areas:

- Abstract thinking
- Attention
- Behavior
- Cognition
- Communication
- Information processing
- Judgment
- Memory
- Problem-solving
- Reasoning
- Sensory, perceptual, motor and/or physical abilities

Waa maxay **dhaawaca maskaxda ee kadiska ah**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarasho si gaar ah loo habeeyay oo ay sabab u tahay dhaawac maskaxeed oo ay sababto xoog dibadeed oo socda ugu yaraan 60 maalmood oo ay keento itaaldarro mid ama ka badan oo ka mid ah meelaha soo socda:

- Fikirka aan la taaban karin
- Feejignaan
- Dhaqanka
- Garashada
- Isgaarsiinta
- Habaynta macluumaadka
- Xukun
- Xusuusta
- Xalinta dhibaatada
- Sababta
- Dareenka, garashada, dhaqdhaqaaqa iyo/ama awoodaha jireed

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is a **specific learning disability**?

When a student requires specially designed instruction due to:

- Pattern of cognitive strengths important for overall learning.
- Pattern of cognitive weaknesses impacting learning.
- Academic weakness compared to peers that is not due to lack of instruction, limited English proficiency or other related factors.

Waa maxay **naafonimada barashada gaarka ah**?

Marka ardaygu u baahdo waxbarid si gaar ah loo habeeyay iyadoo ay ugu wacan tahay:

- Qaabka awoodaha garashada oo muhiim u ah waxbarashada guud.
- Qaabka daciifnimada garashada ee saameeya waxbarashada.
- Daciifnimada tacliinta marka la barbar dhigo ardayda facooda taas oo aan sabab u ahayn xaddidnaanta aqoonta Ingiriisiga ama arrimo kale oo la xiriira.

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped

What is a **developmental delay**?

When a student (younger than 9 years old) requires specially designed instruction due to developmental differences in two or more of the following areas:

- Communication
- Adaptive (practical life skills)
- Physical
- Social/Emotional
- Cognitive

Waa maxay **dib-u-dhaca horumarka**?

Marka arday (kayar 9 jir) uu u baahan yahay wax barid si gaar ah loo habeeyay taasoo ay ugu wacan tahay kala duwanaanshaha korriinka ee laba ama in ka badan oo ka mid ah meelaha soo socda:

- Dad la xiriirka
- La qabsiga (xirfado nololeed oo la taaban karo)
- Jir ahaan
- Bulsho/Dareen
- Garasho (dhug)

Beaverton School District Special Education Department

1260 NW Waterhouse Ave., Beaverton, OR 97006 • www.beaverton.k12.or.us/sped